

# Waa maxay Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee Ku Siijeedka Koolejka?

Deeqda Waxbarasho ayaa ah horay ugu ballanqaad gargaar lacageed gobol ardayda u qalanta ee isqora markay ku jiraa dugsiga dhexe ee oofiya wacadka tagidda koolejka. Barnaamijka waxa maamula Guddiga Guuleysiga Ardayga Washington.

## Waa maxay Wacadku?

Ardayda ku sii jeedda koolejka ayaa wacad ku qaada:

- ★ Inay ka qalinjabiyaan dugsi sare Gobolka Waashington ku yaal oo ay helaan GPA (Celcelis Dhibco Wadareed) ah 2.0 ama ka badan.
- ★ Inaan dembilenimo lagu xukumin.
- ★ Inay codsi gashadaan koolej uqlama arrinta oo ay gudbiyaan Codsiga Lacag La'aanta ah ee Gargaarka Ardayga ee Federalka (FAFSA) ama Gargaarka lacagta ee Gobolka (WASFA) isla kadib Oktoobar<sup>1</sup> ee suurtagalka ah sannadkaaga ugu dambeeya ee dugsiga sare.

## Anigu ma uqalmaa?

Codso haddaad ku jirto heerarka fasalka 7aad ama 8aad oo aad qanciso shuruudaha soo socda midkood:

- ★ Qoyskaaga oo qanciya shuruudaha dakhliga ee ku jirta shaxdahoosta ku taal.
- ★ Adiga oo ku jira daryeel korriin ama ku tiirsan dowladda.
- ★ Qoyskaaga oo qaataa dheefaha cuntada aasaasiga ama TANF.

Tirada Dadka Guriga	Tilmaamah a Dakhliga Sannadlaha	Daqliga bil ahaanee	Wiiq kasta Dakhli
2	\$30,044	\$2,504	\$578
3	\$37,777	\$3,149	\$727
4	\$45,510	\$3,793	\$876
5	\$53,243	\$4,437	\$1,024
6	\$60,976	\$5,082	\$1,173
7	\$68,709	\$5,726	\$1,322
8	\$76,442	\$6,371	\$1,471
Mid kasta oo xubin dheeraad ku ah	Ku dar \$7,733	Ku dar 645	Ku dar \$149

\*Dakhliga qoysku waa inuu ka yaraadaa ama la mid noqdaa intan.

## Sideen u codsadaa?

Kala hadal la taliyahaaga ama booqo onlayn halkan [www.collegebound.wa.gov](http://www.collegebound.wa.gov).

## Ma waxa jirta waqti kama damabayn?

**Haa** Waa inaad codsataa kama dambayn Juun 30 dhammaadka heerkaaga fasal ee 8aad.

## Maxaa dhacaya marka xiga?

Markaad soo gudbiso codsi dhammaystiran, waxaad ku heli doontaa boostada shahaadada Ku Sii-jeedka Kuleejka. Barnaamijka ayaa kuu soo diri doona la socodsiiinta deeqda waxbarashada cinwaanka iimayl ee aad ku qorto codsigaaga.

## Sideen u heli doonaa deeqda waxbarashada?

- ★ Xeree FAFSA ama WASFA sannadkaaga ugu dambeeya ee dugsiga sare iyo sannad kasta oo aad ku jirto koolejka si loo go'aamiyo ugu qalmiitanka dakhliga.
- ★ Gudo shuruudaha wacadka deeqda waxbarasho.
- ★ Ha lagaa aqabalo koolej uqalma.
- ★ Inaad ahaato Muwaaddin marykan ama qof aan ahayn muwaaddin oo uqalma, ama leh heerka DACA.

Deeqda Waxbarasho ee Ku Sii-jeedka Koolejka ayaa ah barnaamij u gobolka fuundeeyo oo maamusho Guddiga Guuleysiga Ardayga (Guddiga). Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijka iyo fursadaha kale ee kaalmada lacageed ee Washington, booqo [www.readysetgrad.org](http://www.readysetgrad.org), ama nagala soo xiriir annaga iimayl [ahaancollegebound@wsac.wa.gov](mailto:ahaancollegebound@wsac.wa.gov), ama telefoon ahaan 888-535-0747, xulashada 1.



WASHINGTON STUDENT ACHIEVEMENT COUNCIL

WAXBARASHO • SINNAAN • NATILJOOYIN